Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 167 Taariikh: 12/11/2024

**XEER: XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAANGALINTA MULKIILAHA DHABTA AH EE SHIRKADAHA.**

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
16 NOV 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG ah ee JFS;

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WGW/FRS/XW/0298/2024** ee ku taariikheysan **04/11/2024** ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha , kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Diiwangalinta Mulkiilaha Dhabta ah ee Shirkadaha** ;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.39.97.11.24** ee **12/11/2024,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Diiwangalinta Mulkiilaha Dhabta ah ee Shirkadaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay Dalka u leedahay **Xeer-nidaamiyaha Diiwangelinta Mulkiilaha Dhabta ee Shirkadaha** ;

**Waxaa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad :**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.39.97.11.24** ee **12/11/2024,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Diiwangalinta Mulkiilaha Dhabta ah ee Shirkadaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

## Qodobka 2aad:

## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Xeer-nidaamiyahan kor ku xusan.

## Qodobka 3aad:

## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

**Summad: XGG/344 /2024** **23/10/2024**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci ku saabsan "XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAAN-GELINTA MILKIILAHA DHABTA AH EE SHIRKADAHA"

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSHH/1687/2024** ee ku taarikheysan **16/10/2024** kana soo baxday Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAAN-GELINTA MILKIILAHA DHABTA AH EE SHIRKADAHA"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si Waafaqsan Sharci **Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa Xeer-nidaamiyaha sare ku xusan oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda kadib markii uu darsay Nuqulka Xeer-nidaamiyahan oo caddeynaya hannaanka lagu maamulayo diiwaan-gelinta milkiilaha dhabta ah ee Shirkadaha, kuna ku daray ra'yigiisa iyo taladiisa Sharci, Xafiisku Garyaqaanku waxa uu ku talinayaa in Xeer-nidaamiyahan la gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama aanu kahor imaanayn Dastuurka iyo Shuruucda dalka.

**FG: Waxa halkan ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.**

**Wabillaahi Towfiiq**

**Avv. Xuseen Xasan C/Ilaahi- Shareeco**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA * OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL * مكتب المحامي العام للدولة

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
**Ministry of Justice and Constitutional Affairs**
**Office of Director Legislations and Agreements Department**

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/1687/2024** **Tr. 16/10/2024**

Mudane Garyaqaan;

**UJEEDDO: "XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAANGELINTA MILKIILAHA DHABTA AH EE SHIRKADAHA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxay halkan ku soo gudbinaysaa "Xeer-nidaamiyaha Diiwaangelinta Milkiilaha Dhabta ah ee Shirkadaha" oo caddeynaya hannaanka lagu maamulayo diiwaangelinta milkiilayaasha dhabta ah ee shirkadaha.

Xeer-nidaamiyahan oo ay diyaarisay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, waxay Wasaaradda Cadaaladdu ka gudatay waajibaadkeeda sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyayaasha.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu waajibkiisa sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyayaasha ka guto, si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

**Wada-shaqeyn Wacan**

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 17/10/2024

Dr. Yasen 19.10-2024

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA**

# XEER-NIDAAMIYAHA DIIWAANGELINTA MILKIILAHA DHABTA AH EE SH IRKADAHA

**Waxaa Diyaarisay: Wasaaradda Ganacsiga Iyo Warshadaha, Luuliyo 2024**

*CUTUBKA KOWAAD* 2
*QODOBBO GUUD* 2
**Qodobka 1aad** 2
**Magaca Xeer-nidaamiyaha** 2
**Qodobka 2aad** 2
**Qeexitaan** 2
*CUTUBKA LABAAD* 3
*XOGAHA MILKIILAHA DHABTA AH* 3
**Qodobka 3aad** 3
**Xogaha Milkiilaha Dhabta ah** 3
**Qodobka 4aad** 4
**Caddaynta lahaanshaha Dheef-dhaqaale** 4
**Qodobka 5aad** 5
**Isbaddellada ku Yimaada Milkiilaha Dhabta ah** 5
**Qodobka 6aad Diiwaangelinta Milkiilayaasha Dhabta ah** 5
**Qodobka 7aad** 6
**Bixinta Xogaha Milkiilaha Dhabta ah** 6
**Qodobka 8aad** 6
**Jaangoynta Khidmadaha** 6
**Qodobka 9aad** 6
**Reebbidda Bixinta Xogaha Milkiilaha Dhabta ah** 6
*CUTUBKA SEDDEXAAD* 7
*QODOBBO ISKU-DHAF AH* 7
**Qodobka 10aad** 7
**Marxallada Kala-guurka** 7
**Qodobka 11aad** 7
**Muddo-kordhin** 7
**Qodobka 12aad** 7
**Ciqaab** 7
**Qodobka 13aad** 7
**Dhaqangal** 7

## CUTUBKA KOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahani waxaa lagu Magacabaa Xeer-nidaamiyaha Diiwaangelinta Milkiilaha Dhabta ah ee Shirkadaha.

### Qodobka 2aad
### Qeexitaan

Erayada soo socda waxay Xeer-nidaamiyaha gudihiisa ku yeelanayaan qeexitaanka mid kasta ku hor qoran:

1. **Milkiilaha Dhabta ah:** Waxaa loola jeedaa qof Dhabta ah:
   a) oo leh saami ka badan **10%** ee saamiga shirkad ama leh awood talin ama maamul oo ku noqonayo qofka sida Dhabta ah u leh ama ugu taliya shirkadda;
   b) oo ku leh shirkad dano ama dheef dhaqaale oo ballaaran si toos aha ama si dadban;
   c) oo isagoo wakiil laga yahay loo fuliyo hawlo baayac-mushtar ah; ama
   d) leh awood wax-ku-ool oo uu ugu taliyo shakhsi qaanuuni ama wax u dhigma.
2. **Dheef-dhaqaale:** Waxaa loola jeedaa dano dhaqaale oo ballaaran ama awood wax-ku-ool ah oo loogu taliyo shirkad;
3. **Hay'ad Dawlad:** Waxaa loola jeedaa hay'adda dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
4. **Talin:** Waxaa loola jeedaa xaqa go'aan ka gaaridda magacaabidda maamuleyaasha shirkadda ama lagu jiheeyo maamulka iyo go'aannadooda, si toos ah ama si dadban, iyadoo xaqaasi lagu yeeshay ahaansho saamile, haysasho awood maamul, xaqa cod-bixinta ama iyadoo la adeegsanayo wakiil ama cid u dhiganta;
5. **Milkiilaha aan Daahsoonayn:** Waxaa loola jeedaa qof dabiici ah kaasi oo magaciisu ugu diiwaangashan yahay shirkaddu

inuu ku leeyahay dano dhaqaale;

6. **Milkiilaha daahsoon:** Waxaa loola jeedaa qof rasmi ah kaasi oo shirkad ku leh dano dhaqaale oo aan magaciisa ku diiwaangashanayn;

7. **Lahaansho dhab ah:** Waxaa loola jeeda Milkiilaha Dhabta ah;

8. **Sharciga Shirkadaha:** Waxaa loola jeedaa Sharciga Shirkadaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo tirsigiisu yahay **18** soona baxya **26 December 2019**;

9. **Wasiir:** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

10. **Milkiile diiwaangashan:** Waxaa loola jeedaa qof kasta oo magaciisu ku dhigan yahay diiwaanka saamillayda Shirkadda;

11. **Diiwaan-haye:** Waxaa loola jeedaa qofka ku qeexan qodobka **2aad (9)** ee Xeer-nidaamiyahan.

## CUTUBKA LABAAD
## XOGAHA MILKIILAHA DHABTA AH

### Qodobka 3aad
### Xogaha Milkiilaha Dhabta ah

1. Cid kasta oo doonaysa in loo diiwaangeliyo shirkad si waafaqsan Sharciga Shirkadaha waa in ay u gudbisaa Diiwaanhayaha xogaha Milkiilaha Dhabta ah sida:
   a. Magaciisa oo dhammeystiran oo uu ku jiro magac kale oo horey loogu garanayay ama hadda lagu yaqaano;
   b. Taariikhda iyo goobta dhalashada;
   c. Taleefankiisa;
   d. Jinsiyadiisa, tirsiga aqoonsigiisa Qaranka, dulkummarkiisa ama aqoonsi kasta oo kale oo si buuxda loogu aqoonsan karo;
   e. Rugtiisa, cinwaannada dhambaallada iyo farriimaha danabaysan loogu diro haddii uu leeyahay;
   f. Goobta shaqadiisa iyo xilka uu ka hayo; iyo
   g. Faahfaahin ku saabsan danaha sharci, dhaqaale iyo dan kasta oo kale taasi oo ka dhigi kara Milkiilaha Dhabta ah ee shirkadda.

2. Shirkad kasta waa inay Diiwaanhayaha ku ogeysiisa si qoraal ah muddo 30 (soddon) maalmood oo shaqo ah gudahood marka Milkiileyeasha aan daahsooneyn lagu qoro diiwaanka saamilayda shirkadda.
3. Shirkad leh Milkiile Daahsoon waa inay u gudbisaa Diiwaanhayaha xogaha Milkiilaha Dhabta ah muddo 30 (soddon) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda lagu qoray diiwaanka saamilayda Shirkadda iyo Milkiilayaasha Dhabta ah, iyadoo raacaysa habka uu jiddeeyo Wasiirka.
4. Shirkaddu waa inay si qoraal ku ogeysiisaa Diiwaanhayaha marka uu Milkiile Daahsoon waayo ahaanshiyaha Milkiilaha Dhabta ah ee shirkadda muddo 30 (soddon) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda waayidda ahaanshiyaha Milkiilaha Dhabta ah, iyadoo raacaysa habka uu jiddeeyo Wasiirka.

## Qodobka 4aad
## Caddaynta lahaanshaha Dheef-dhaqaale

1. Qof ay shirkad ugu qortay diiwaankeeda saamilayda iyo Milkiilayaasha Dhabta ee shirkadaasi inuu yahay Milkiile Diiwaangashan balse aanan shirkadda ku lahayn Dheef-dhaqaale, waa inuu shirkadda si qoraal ah ugu caddeeyaa inuusan Dheef-dhaqaale ku lahayn muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda lagu qoray diiwaanka shirkadda ee saamilayda iyo Milkiilayaasha Dhabta ah isagoo raacaya habka uu jiddeeyo Wasiirka.
2. Milkiilaha aan daahsooneyn waa inuu shirkadda si qoraal ah ugu caddeeyaa isbaddel kasta oo ku yimaadda Dheeftiisa-dhaqaale muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda uu isbaddelkaasi dhacay isagoo raacayaa habka uu jiddeeyo Wasiirka.
3. Milkiilaha Daahsoon waa inuu shirkadda si qoraal ah ugu caddeeyaa Dheefta dhaqaale ee uu shirkadda ku yeesho muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda uu yeeshay Dheefta dhaqaale isagoo raacaya habka uu jiddeeyo Wasiirka.
4. Milkiilaha Daahsoon waa inuu shirkadda ugu caddeeyaa si qoraal ah isbaddel kasta oo ku yimaada Dheeftiisa dhaqaale muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda uu isbaddelkaasi dhacay isagoo raacayaa habka uu jiddeeyo Wasiirka.
5. Marka ay shirkaddu hesho caddaynta lahaanshaha Dheefta dhaqaale si waafaqsan farqadaha qodobkan, waa inay u gudbisaa macluumaadkaasi Diiwaanhayaha muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda ay heshay caddaynta lahaansha Dheefta dhaqaale isagoo raacayaa habka uu jiddeeyo Wasiirka.

## Qodobka 5aad
## Isbaddellada ku Yimaada Milkiilaha Dhabta ah

1. Shirkad kasta waa inay u gudbisaa Diiwaanhayaha isbaddelada ku yimaada Milkiileyaasheeda Dhabta ah muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda uu isbaddelkaasi dhacay isagoo raacayaa habka uu jiddeeyo Wasiirka.
2. Shirkad kasta waa inay u gudbisaa Diiwaanhayaha, iyadoo raacaysa habka uu jiddeeyo Wasiirka, isbaddel kasta oo ku yimaada raasumaalkeeda oo ay sababtay wareejin ku salaysan rabitaan ama mid sharcigu jiddeeyay, dib-u-qaabaynta shirkadda ama xaqa codbixinta taasi oo saamaysa Dheefaha dhaqaale ee lagu qabo shirkadda. muddo soddon (30) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda uu isbaddelkaasi dhacay isagoo raacayaa habka uu jiddeeyo Wasiirka.
3. Diiwaanhayuhu ma diiwaangelinayo wargelin loo soo gudbiyay kuna saabsan yeelasho saami ama qoraal kasta oo kale, kaasi oo la xiriira isbeddel ku dhacay raasumaalka iyo xaqa codbixinta shirkadda haddii aan la buuxin shuruudaha ku tilmaaman faqradda (2)ee qodobkan.

4. Wargelin ku saabsan isbaddel ku yimaada dheefaha dhaqaale ee lagu qabo shirkadda kuna tilmaaman faqradaha qodobkan, waxaa saxiixaya maamulaha guud ee shirkadda, wuxuuna wargelintaasi iyo nuqul aqoonsi rasmi ah oo sugan ee Milkiilayaasha Dhabta ah u gudbinayaa Diiwaanhayaha.

## Qodobka 6aad
## Diiwaangelinta Milkiilayaasha Dhabta ah

1. Diiwaanhayaha waa inuu sameeyaa diiwaanka Milkiilayaasha Dhabta ah, kaasi oo lagu dhigayo ama qorayo xogaha soo socda:
   (a) Xogaha ku tilmaaman Qodobka 3aad (1) ee Xeer-nidaamiyahan;
   (b) Xogaha soo socda ee la xiriira haddii uu shakhsi qaanuuni ah yahay:
      i. Magaca shakhsiga qaanuuniga ah;
      ii. Xaruntiisa dhexe;
      iii. Aqoonsiga maamulayaasha, saamilayda iyo Milkiilayaasha Dhabta ah;
      iv. Caddaynta ahaanshiyaha shakhsi qaanuuni; iyo
      v. Xogaha kale ee lagama maarmaanka u ah ogaanshaha cidda leh ama u talisa shakhsiga qaanuuniga ah.
2. Diiwaanhayaha wuxuu diidi karaa diiwaangelinta arrin kasta oo shirkad ku saabsan si waafaqsan Sharciga Shirkadaha, haddii aan loo soo gudbin xogaha Milkiilayaasha Dhabta ah ama uusan ku qancin in shirkaddu soo gudbisay xogaha ugu dambeeyay kuwaasi oo sugan kuna saabsan Milkiilayaasha Dhabta ah ee shirkadda.

3. Markuu Diiwaanhayuhu diido diiwan-gelinta arrin ku saabsan shirkad si waafaqsan faqradda (2) ee Qodobkan, waa inuu go'aankiisa diidmada ah uu si qoraal u gaarsiiyaa qofka ama shirkadda ay khusayso muddo 30 (soddon) maalmood oo shaqo ah gudahood oo ka billaabata taariikhda loo soo gudbiyay si uu u diiwaangeliyo.
4. Go'aanka diidmada ee Diiwaanhayaha waxaa cabasho looga qaadan karaa Wasiirka, oo uu go'aankiisu noqonayo mid kama dambaysa ah.
5. Cid kasta oo aan ku qancin go'aanka Wasiirka, waxay cabasho uga qaadan kartaa go'aankiisa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 7aad
## Bixinta Xogaha Milkiilaha Dhabta ah

Xogaha Milkiilaha Dhabta ah waa in la siiyaa Hay'adaha soo socda haddii ay codsi qoraal ah u soo gudbiyaan Diiwaanhayaha:

a) Hay'adaha dowladeed ee u xilsaaran la-dagaalanka lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagexisada;
b) Hay'adaha dawladeed ee u xilsaaran baarista iyo dacwad-oogidda dambiyada la xiriira lacag-dhaqidda iyo maalgelinta argagexisada, ama dabagalka, xayiraadda iyo la-wareegidda hantida lala xiriirnayo fal-dambiyeed;
c) Xarunta Warbixinnada Maaliyadda;
d) Hay'adaha dowladeed ee u xilsaaran la socodka iyo hirgelinta xoojinta dhaqaalaha dalka si waafaqsan xeerarka dalka; iyo
e) Hay'ad Dawlad oo aanan ahayn kuwa ku tilmaaman xarfaha (a)(b) iyo (c) ee Qodobkan kuwaas oo u xilsaaran la-dagaalanka lacag-dhaqidda, maal-gelinta argagexisada ama canshuuraha.

## Qodobka 8aad
## Jaangoynta Khidmadaha

Wasiirka ayaa soo saaraya xeer wasiir oo uu ku jaangoynaya khidmadaha la bixinayo marka la soo gudbinayo wargelinnnada, ogeysiisyada iyo caddaymaha ku cad Xeer-nidaamiyahan si loo diiwaangeliyo.

## Qodobka 9aad
## Reebbidda Bixinta Xogaha Milkiilaha Dhabta ah

1. Shirkadda waxaa ka reebban bixinta iyo adeegsiga ku saabsan xogaha Milkiilayaasheeda Dhabta ah marka laga reebbo sida uu farayo Sharciga Shirkadaha iyo Xeer-nidaamiyayaashiisa, xeerarka kale ee dalka, amar Maxkamad ama uu faro Milkiilaha Dhabta ah ee ay khusayso.

2. Diiwaanhayaha, hay'ad dawlad ee ku tilmaaman Qodobka 7aad ee Xeer-nidaamiyahan iyo saraakiishoodaba waxaa ka reebban inay bixiyaan ama siiyaan - xogaha qarsoodiga ah ee ay ku heleen si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan xitaa marka ay shaqada ka tagaan - qof uusan sharcigu u oggoleyn helidda xogahaasi.

**CUTUBKA SEDDEXAAD**
**QODOBBO ISKU-DHAF AH**

## Qodobka 10aad
## Marxallada Kala-guurka

Shirkad kasta oo la diiwaangeliyay ka hor dhaqangalka xeer-nidaamiyahan waa inay buuxisaa shuruudaha uu dhigayo Xeer-nidaamiyahan muddo lix (6) billood gudahood ah oo ka billaabmaysa maalinka 1aad ee Xeer-nidaamiyahani dhaqangalo.

## Qodobka 11aad
## Muddo-kordhin

1. Shirkaddu waxay codsi muddo-kordhin ah ka dalban kartaa Diiwanhayaha haddii ay ku guuldarraysato inay u hoggaansanto muddada ku qeexan Qodobka **10aad** ee Xeer-nidaamiyahan.

2. Diiwaanhayuhu, marka uu ku qanco sababaha ay mudda kordhintu ku salaysan tahay, wuxuu siin karaa codsadaha muddo aan ka badnayn 30 (soddon) maalmood oo shaqo ah, si uu ugu hoggaansamo Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 12aad
## Ciqaab

1. Shirkad kasta oo:
   a) ku guuldarraysata inay diiwaan u samayso Milkiileyaasheeda Dhabta ah;
   b) ku guuldarraysata inay gaarsiiso ama u gudbiso Diiwaanhayaha xogaha ku saabsan isbaddelka Milkiilayaasha Dhabta ah ee shirkadaasi;
   c) ku guuldarraysata inay gaarsiiso ama u gudbiso Diiwaanhayaha caddaymaha ku saabsan Milkiilayaasha Dhabta ah ee shirkadaasi; ama
   d) jebisa qodobbada Xeer-nidaamiyahan waxay galaysaa xadgudub, waxaana lagu ciqaabayaa marka ay ku caddaato:
      I. ganaax caddadkiisu yahay **$50 (konton)** doolar ama Shillin Somali u dhigma, maalinkiiba taasoo ka soo billaabmaysa taariikhda u hoggaansamid la'aantu billaabatay illaa taariikhda ay shirkaddu uga hoggaansamayso xeer-nidaamiyahani;
      II. hakinta shatiga ganacsiga;
      III. ganaaxa iyo hakinta shatiga ee ku xusan faqrad-hoosaadyada (I iyo II).

## Qodobka 13aad
## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqagalaya marka ay ansixiyaan Golaha Wasiirada uuna saxiixo Ra'iisul Wasaaraha laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.